

❑ Sida CODKAAGA loo muujiyo ee.

Isku Duwaan Geil La Socodka Warqadaada Codaynta! Waxa lagu wargelin doonaa marka aanu boos kuugu soo dirno warqada codaynta iyo marka codkaaga la tiriyo. Waxa lagu soo diri doonaa muuqaal "Waan Codeeyay" Warqada ah! Iska duwaan geli multnomah.ballottrax.net.

Waxa aad heshaa natiijada habeenka doorashada ee aan rasmiga ahayn laga bilaabo 8 Habeenimo Noofember 3 adiga oo galaya www.mcelections.org. Natiijada doorashada ee saxda ah waxaa la ansixiyee Noofember 23.

Waad ku mahadsan tahay codaynta!



Su'aalo?

Waxa aanu u joognaa halkan in aanu ku caawino.

Taleefanka: 503-988-VOTE (8683)
limeel: elections@multco.us
Websayt: www.mcelections.org

Xafiiska Guud:

Multnomah County Duniway-Lovejoy
Elections Building
1040 SE Morrison Street
Portland, OR 97214

Goobta Gresham:

Furan Oktoober 12 - Noofember 3, 2020
Goobta Codaynta ee Dhismaha Bari ee
Degmada Multnomah
600 NE 8th Street
Gresham, OR 97030



Qorshayso Inaad CODAYSO!

U diyaar garaw Noofember 3, 2020 Doorashada Guud.

- ❑ Isku duwaan Geli Si AAD U CODAYSO.
- ❑ Hel Warqadaada Codaynta.
- ❑ KU RID Warqadaada Codaynta
- ❑ Soo Celi Warqadaada Codaynta.
- ❑ Sida CODKAAGA loo muujiyo ee Isbadal Loo Sameeyo.

Isku duwaan Geli Si AAD U CODAYSO.

Isku duwaan geli online ahaan adiga oo qabanaya oregonvotes.gov/register.

Talaato Oktoober 13 - Wakhtiga Isku Duwaan Gelinta Codayntu Ku Eeg Tahay

Cusboonaysii is duwaan gelintaada codaynta

- wakhti kasta oo aad guurto,
- badasho magacaaga,
- ama aad doonayso inaad badasho xisbigaaga siyaasadeed.

Waxa aad sidoo kale kal dalban kartaa xafiiska waraaqaca Kaadhka Isduwaan Gelinta Codeeyaha oo ku qoran Ingiriisi, Jayniis, Ruush, Soomaali, Isbaanish, ama Fiitnaamiis.

Hel Warqadaada Codaynta.

Waxa laguugu soo diri doonaa boosta warqadaada codaynta laga bilaabo Oktoobar 14. Hadii aanad helin warqadaada codaynta ugu danbayn Oktoober 22 waxa aad kala hadashaa xafiiska doorashada (503)988-8683 si uu kuugu badalo warqadaada codaynta.

Isticmaal Sii Dalbashada Badalka Warqada Codaynta Adeega ah laga bilaabo Oktoober 22 hadii aad u baahato oo ku jira multco.us/orderahead ama nala soo hadal.

Hadii aad ka maqnaan doonto deegaanka doorashadan, waxa aad isku duwaan gelisaa codaynta maqnaanshaha, oo aad heleyso laga bilaabo Sebteember 21.



KU RID Warqadaada Codaynta

Xasuuso inaad saxeexo bushqada warqada codaynta lagu soo celinayo. Saxeexaagu waxa uu u dhigmaa aqoonsigaaga. Saxeex kasta oo warqad kasta waa la eegi doonaa si loo xaqiijiyo inuu lamid yahay saxeexa ku yaala duwaanka'codeeyaha. Hadii aad ilawdo inaad saxeexo ama saxeexaagu aanu lamid ahayn waxa aanu kuu soo diri doonaa warqad oo waxa aanu kugula soo xidhiidhi doonaa La Socodka Warqadayda Codaynta si aad talaabo u qaadi karto oo codkaaga aanu u tirino.

Miyaad qabta wax su'aalo ah ama baahi in lagaa caawiyo ah codaynta?

Shaqaale ku luuqado badan iyo turjubaano ayaa diyaar ah, oo bilaash u ah cid kasta oo u baahan inay laga caawiyo codaynta ama inay fahanto nidaamka codaynta.



Soo Celi Warqadaada Codaynta.

Waxa aad kusoo celin kartaa warqadaada codaynta adiga oo boosta kusoo diraya. Shaambad looma baahna! Waxaad warqadaada codaynta noogu soo dirtaa boosta anaka ugu danbayn Talaatada, Oktoober 27 si loo xaqiijiyo in wakhti wanaagsan uu helo xafiiskaayagu. Lama eegayo tigidhka boosta Oregon.

Waxa keeni kartaa warqadaada codaynta Goobaha Sanduuqyada Rasmiga ah ee Lagu Diro Codka. Waxa aad kasoo celisaa warqadaada codaynta 24 saacadood Goobaha Sanduuqyada Rasmiga ah ee Lagu Diro Codka ee Gobolka ama Sanduuqyada Codaynta Laybareeriga Degmada Multnomah 24 saacadood.

Dhamaan Goobaha Sanduuqyada Rasmiga ah ee Lagu Diro Codka Swaxay ku jiraan multco.us/dropsites.